# JAMHURIYADA SOMALILAND

## XEERKA DOORASHADA GOLAHA WAKIILADA

(Xeer No. 20-2/2005 )

HARGEISA, 2005

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/DECM/249-1220/042005

DATE 11/04/05

## DECREETO MADAXWEYNE NO: 068/2005

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu helay:** Go'aanka GW ee Lr. GW/KFQC-01/335/2005 ee 18/01/2005 oo uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyey Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada Xeer N0: 20-2/2005 iyo Go'aankii Golaha Guurtida N0: GG/JSL/Kf-26/Go-02/02/2005 ee 05/02/2005.

**Markuu helay:** Go'aanka Maxkmadda Dastuuriga ah ee soo baxay 26/02/05, oo dhigaya: Markay Maxkamadda u caddaatay in ay qodobada 10aad,13aad,38aad,44aad ee Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada mudada loo cayimo, sidaas darteed, Maxkamadda Dastuuriga ahi waxay laashay qodobada 10aad, 13aad, 38aad,44aad ee Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada ee N0: 20-2/05 ee 18/01/05. Qodobada la laalay wixii qaab farsamo ah ee looga maarmi waayo socodsiinta Hawsha Doorashada Golaha Wakiilada, waxa loo raacayaa Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanada Dalka ee lam: 20/2001.
Xeer N0: 20-2/05, marka laga reebo Qodobada la laalay, waxa si toos ah loogu dhaqmayaa marka uu saxeexo Madaxweynaha JSL.

**Markuu helay:** Go'aanka GW/KFQC-01/338/2005 ee 02/04/2005 ee uu Goluhu ku ansixiyey soo jeedinta wax-ka bedelka iyo kaabidda Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada Xeer N0: 20-2/2005.

**Markuu arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu Soo Saarayaa**

**Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan galk Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada JSL Xeer No: 20-2/2005.**

Allaa Mahad Leh

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweyne

REPUBLIC OF SOMALILAND President

M-M-Dubbe

*Bismilaahi Raxmaani Raxiim*

GOLAHA WAKIILADA JSL

| | |
|---|---|
| Markuu arkay: | Qodobada 22aad, 40aad, iyo 41aad, ee Dastuurka Qaranka JSL. |
| Markuu tixgeliyey: | xuquuqda dastuuriga ah ee muwaadiniintu u leeyihiin in la doorto, waxna ay doortaan. |
| Markuu Xaqiiqsaday: | in hirgalinta doorashada Golaha Wakiiladu dhamaytirayso hanaanka dimoqraadiyadeed ee lagu beegsanayo taabagalinta buuxda ee qaranimada Somaliland. |

## WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN OO AH LIFAAQA XEER No. 20/2001

### Qodobka Iaad
### Macnaha erey-bixinta

| | |
|---|---|
| Doorasho: | Waxa loola jeedaa hawlgalka kala saaridda murashaxiinta u tartamaya xubinimada Golaha Wakiilada, iyadoo lagu go'aan qaadanayo aqlabiyadda codadka muwaadiniinta cod- bixiyayaasha ah. |
| Komishanka: | waxaa loola jeedaa Guddiga Qaranka ee u xilsaaran maamulidda hawlaha doorashooyinka. |
| Goobo-codbixin: | waxa loola jeedaa goobaha tirooyin cod-bixiyayaasha ka mid ah oo isku degaan dhaw ka dhiiban karaan codkooda ee Komishanku cayimo. |
| Wakiil: | waxa loola jeedaa xubinta xisbi u soo wakiishay la socodka hawlaha doorashada ee goob-cod-bixineed ama xafiisyada doorashada ee degmo, gobol ama xarunta komishanka. |
| Musharax: | waxa loola jeedaa xubinta xisbigiisu u soo magacaabay inuu u tartamo xubinimada Golaha Wakiilada si xeerka waafaqsan. |
| Cod-bixiye: | waxa loola jeedaa qofka buuxiyey shuruudaha cod-bixinta ee xeerku tilmaamay ee go' aankiisa ku dhiibanaya codayn. |

M·M· Dubbe



Q.

M·M·[signature]

| | |
|---|---|
| Kursi: | waxa loola jeedaa jagada xubinimada Golaha Wakiilada ee hal qof loo dooran karo. |
| Astaan: | waxa loola jeedaa summadda ama calaamadda u gaarka ah hal xisbi/Musharax ee loo diiwaangeliyay in lagu aqoonsado |
| Liis: | waxa loola jeedaa magacyada musharaxiinta doorashada Golaha Wakiilada ee Xisbi kasta u soo gudbiyo Komishanka. Kuwaas oo si siman ugu tartamaya doorashada, kala horaynta magacyadooduna wax tixgelin ah aanay u lahayn kala doorashadooda. |
| Saraakiisha dawladda: | waxa loola jeedaa shaqaalaha masuuliinta ah ee ku siman agaasime waaxeed iyo wixii ka sareeya iyo madaxda hay'adaha madaxa banaan ee dawladda, iyo sidoo kale, madaxda ciidamada ee ku siman taliye urur ama taliye saldhig boolis iyo wixii ka sareeya. |
| Ololaha Doorashada: | waxa loola jeedaa hawlgalka ay Axsaabtu iyo murashaxiintoodu ugu tartamayaan iska dhaadhicinta iyo soo kala jiidashada cod-bixiyayaasha, si xeerkan waafaqsan |
| Xafiiska dhexe: | waxa loola jeedaa xarunta ugu saraysa ee laga maamulayo hawsha doorashada ee ay ku shaqeeyaan Komishanka Qaranka ee Doorashooyinku. |
| Xafiiska Gobolka: | waxa loola jeedaa xafiiska laga maamulayo hawlaha doorashada ee Gobol ee Komishanku sameeyo, si xeerkan waafaqsan |
| Xafiiska Degmada: | waxa loola jeedaa xafiiska doorashada laga maamulayo ee degmo ee Komishanku sameeyo, si xeerkan waafaqsan. |
| Xafiiska Goobta: | waxa loola jeedaa goobta muwaadiniintu cod-bixinta ka dhiibanayaan ee laga maamulayo hawlaha cod-bixinta. |
| Hawl-wadeen: | waxa loola jeedaa shaqaalaha kala duwan ee komishanku hawlgeliyay inay ka shaqeeyaan goobaha cod-bixinta, xafiisyada doorashada ee degmooyinka iyo gobolada iyo xarunta dhexe ee xeerku jideeyay. |
| Xad-gudub: | waxa loola jeeda fal kasta iyo qawl kasta oo lid ku ah nidaamka doorashada iyo nabadgelyada guud. |
| Goob-joogayaal: | Waxa loola jeedaa kormeerayaasha caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha doorashada ee Komishanka Qaranku aqoonsadey. |
| Jajab: | Waxaa loola jeedaa tirada codadka ee ka yar inta hal kursi lagu heli karo. |

M.M. Dubbe

**Si taxana ah:** Waxaa loola jeedaa wax kala duwan oo xidhiidhsan oo loo qoray si isdaba taala oo midba midka kale ka horeeyay.

## Qaybta I
## MABAADIIDA GUUD

### Qodobka 2aad
### Adeegsiga - Xeerka

Xeerkan waxa lagu maamulayaa loona adeegsanayaa doorashada xubnaha Golaha Wakiilada JSL.

### Qodobka 3aad
### Tirada Xubnaha iyo Doorashada Golaha Wakiilada

Golaha Wakiilada JSL wuxuu ką kooban yahay 82 (sideetan iyo laba) xubnood. Kuwaas oo lagu soo dooranayo doorasho guud oo toos ah iyo cod-bixin qarsoodi ah oo xor ah, sida uu qeexay qodobka 40aad ee Dastuurku.

### Qodobka 4aad
### Mudada Xilka

Mudada xilka ee musharixiinta ku guulaysta doorashada xubinimada Golaha Wakiilada waa 5 (shan) sano, oo ka bilaabmaysa maalinta Maxkamadda Sare ku dhawaaqdo go'aamada doorashada, sida uu tilmaamay qodobka 42(1)aad ee Dastuurka JSL.

### Qodobka 5aad
### Shuruudaha Cod-Bixiyaha

1. Waa inuu yahay Muwaadin Somaliland u dhashay ama qaatay muwaadinimada Somaliland, si Xeerka Jinsiyadda waafaqsan.
2. Waa in aan da'diisu ka yaraan 16 sano, sanadka doorashada la qabanayo.
3. Waa inuu xor yahay oo aanu xabsi ku jirin maalinta doorashadu dhacayso.

### Oodobka 6aad
### Xuquuqda Cod-Bixivaha

Cod-bixiye kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamay wuxuu xaq u leeyahay:-

1. Inuu codkiisa ka dhiibto goobta uu ku sugan yahay ee doorashadu ka socoto.
2. Marka JSL hesho aqoonsi caalami ah, muwaadiniinta buuxiyey shuruudaha cod-bixinta ee ku sugan dal shisheeye xilliga doorashada la qabanayo, wuxuu codkiisa ka dhiiban karaa xafiisyada diblomaasiyadeed ee JSL ku leedahay dalalka shisheeye ee ugu dhow.
3. Codku waa inuu ahaado mid shakhsi ah, xor ah, toos ah, qarsoodi ah oo si siman loo tixgeliyo.
4. Cod-bixiye kastaa wuxuu yeelanayaa hal cod oo keliya doorashadiiba.

### Qodobka 7aad
### Xaqa is Sharixidda

1. Muwaadin kasta oo buuxiyay shuruudaha xeerku tilmaarnay wuxuu iska sharixi karaa xisbiga uu ka tirsan yahay, si waafaqsan xeerkan.
2. Guddiga Fulinta ee Xisbiga ayaa iska leh awooda xulista musharixiinta. Waxayna ku soo saarayaan go'aan Guddi-fulineed liiska musharixiinta marka aqlabiyadda Guddigu isku raacdo ka dib markay helaan soo jeedinta Guddida xisbiga ee heer gobol.



4.

3. Uma bannaana qof shaqaale dawladeed ah ama hay'adaha madaxa bannaan ee dawladda ama kuwa Ciidamada qaranka, derejo kasta ha lahaadaane inay isu sharaxaan doorashada Golaha Wakiilada, haddii aanay iska casilin xilka, afar bilood ka hor maalinta doorashadu dhacayso. Sida uu dhigayo qod. 41'aad, farq. 7aad ee Dastuurka qaranku
4. Shaqo-ka-tegidda ama is casilaada waa in laga aqbalo, qoraalna sidaa ku soo caddeyso cidda awooda u lihi.

### Qodobka 8aad
### Wakhtiga Qabashada Doorashada

Komishanka Qaranka ayaa soo cayimaya taariikhda la qabanayo doorashada Golaha Wakiilada, waxayna ku soo baxaysaa Degreeto Madaxweyne.-sida ku cad qod. 42'aad ee Dastuurka.

### Qodobka 9aad
### Samaynta Gobolo-doorasho

1. Marka la qabanayo doorashada Golaha Wakiilada ee JSL, waxa dalka loo qaybinayaa gobolo-doorasho iyada oo la waafajinayo soohdimihii ay lahaayeen lixdii degmo ee jiray 26 June 1960 ee hadda gobolada ah, si waafaqsan qodobka 109aad ee Distuurka Qaranka.
2. Komishanka qaranka ayaa laga doonayaa inuu sameeyo gobolo-doorasho ugu yaraan 60 maalmood ka hor intaanay maalinta codbixinta. Waxaanuu Komishanka Qaranku arrintaa kala tashanayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Gudoomiyayaasha Gobolada iyo saddexda Xisbi Qaran.
3. Komishanka ayaa ku dhawaaqaya warbaahintana u gudbinaya gobolada-doorasho (electoral regions) ee la cayimay, markay la tashadaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Gudoomiyayaasha Gobolada iyo Sadexda Xisbi Qaran.

## Qaybta II
## HANAANKA DOORASHADA

### Qodobka 10aad
### Habka Doorasho

1. Xisbi kasta oo doonaya inuu ka qayb galo doorashada Golaha Wakiilada, waxa laga doonayaa inuu komishinka qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay ugu tartamaan doorashada oo gobolaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida gobol kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah.

2. Kuraasta gobol-doorasho, waxa Axsaabtu ku kala helayaan habka saami-qaybsiga (proportional representation system), ee kuraasida iyo codadka xisbi waliba ka helo gobolkaas.

### Qodobka 11aad
### Goobaha Codbixinta

1. Gobol-doorasho kasta wuxuu yeelanayaa goobo codbixineed, waxaana cayimaya komishanka qaranka, markuu la tashado Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Gudoomiyayaasha Gobolada, iyo Xisbiyada Qaranka.

2. Komishinku waa inuu goobahaas codbixineed ku sameeyo ugu yaraan (60), maalmood ka hor maalinta codbixinta la qabanayo.

M.M. Dubbe

## Qodobka 12aad

## Habka Qaybinta Kuraasida

1) Iyadoo mudnaanta koowaad la siinayo danta qaranka ugu jirta taabagalinta doorashada awgeed, saamiga kuraasida goboladu ku yeelanayaan Golaha Wakiilada waxa doorashadan oo keliya loo qaybiyay sidan:

1. Gobolka Hargeysa ............ 20 Kursi
2. Gobolka Togdheer ............ 15 Kursi
3. Gobolka Awdal ............... 13 Kursi
4. Gobolka Sanaag ............... 12 Kursi
5. Gobolka Sool .................. 12 Kursi
6. Gobolka Saaxil ............... 10 Kursi

2) Marka doorashadu qabsoonto ee la isu geeyo wadarta guud ee codadka ansaxay ee gobolka kasta waxa loo qaybinayaa tirada kuraasida gobolkaas loo cayimay, markaa waxa la ogaanayaa qadarka codadka hal kursi lagu heli karo. Intaa dabadeed, waxa la isu qaybinayaa tirada codadka xisbi kasta ka helay gobolka iyo qadarka codadka hal kursi lagu heli karo, halkaasna waxa ka soo baxaysa tirada kuraasida gobolka ee xisbi kasta ku guulaystay.

3) Marka tirada codadka ansaxay ee gobolka iyo tirada kuraasida gobolkaas la isu qaybiyo, haddii ay jiraan tirooyin codad jajab ah oo xisbi kasta marka gaarkiisa loo eego ka yar qadarka codadka hal kursi lagu heli karo, waxa xisbiyadu kursiga ama kuraasida hadhay u kala helayaan sida ay ugu kala badan yihiin tirada codadka jajabka ah.

4) Marka la fuliyo hawlgalka ku tilmaaman faqradaha (2 & 3) ee qodobkan, tirada kuraasida ee xisbi kasta marka gaarkiisa loo eego ka helo kuraasida gobolka u xadidan, waxa musharixiinta xisbi kasta gudihiisa u kala qaadanayaan sida ay u kala cod badan yihiin, iyagoo ku kala helaya aqlabiyad fudud (simple majority).

5) Haddii degaano dalka ka mid ah ay la soo gudboonaato duruufo culus ama xaalado aan saamaxayn in doorasho ka qabsoonto, waxa soo qiimaynaya go'aanna ka gaadhaya xaaladahaas Guddiga Qaranka ee Doorashooyinka, markay sidaa isla gartaan Xukuumadda iyo Axsaabta Qaranka.

6) goobaha codbixinta ee doorashadu ka qabsoomi waydo, tirada kuraasida loo qoondeeyay goobahaas waxay xisbiyadu u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee gobolka.

7) Haddiise, ay doorashadu gobol dhan ka qabsoomi waydo, waxay Axsaabtu kuraasida gobolkaas u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay dalka. Waxana loo raacayaa sida magacyadoodu liiska u kala horeeyaan.

## Qodobka 13aad

## Liiska Musharixiinta

1. Xisbi kasta waxa uu komishanka u soo gudbinayaa liiska magacyada musharixiintiisa uu u xulay inay u tartamaan doorashada. Kaas oo ku salaysan tirada kuraasida gobolka loo qoondeeyay, una qoran si taxane ah.

6.

2. Axsaabtu waa inay tixgeliyaan xaqa muwaadiniinta ee doorashada iyo ka qaybgalka hawlaha siyaasadda, iyadoo aan lagu kala soocayn jinsiga, luqada, iwm. Sida uu jidaynayo qodobka 22aad ee Dastuurku. sidoo kale, waa inay dhiirigaliyaan ka qaybgalka haweenka iyo dadka laga tirada badan yahay talada dalka sida uu tilmaamay qodobka 36(2)aad ee Dastuurku.

### Qodobka 14aad
### Musharixiinta Doorashada Ku Guul-Daraysta

1. Musharaxiinta liisaska xisbiyada ee kuraasi waaya waxay noqonayaan musharixiin kayd ah. Waxayna xaq u leeyihiin inay buuxiyaan marka ay jago baneeyaan Mudanayaasha xisbigooda kaga jira Golaha Wakiilada.
2. Marka ay banaanaato xubin/ xubno ka mid ah Golaha Wakiilada si waafaqsan asbaabaha ku xusan qodobka 50aad ee Dastuurka, Shirgudoonka Goluhuna sidaa caddeeyo, waxa Komishanku bedelkii xubinta/xubnaha banaan ku buuxinayaa musharaxiinta kaydka xisbiga ay ka soo jeedeen kuwa banneeyay, muddo aan laba todobaad ka badnayn. Waxana loo raacayaa sida ay u kala cod badnaayeen.

## Qaybta III
## MUSHARIXIINTA

### Qodobka 15aad
### Shuruudaha Musharaxa

Sida uu tilmaamayo qodobka 41aad ee Dastuurku, qofka isu taagaya doorashada Golaha Wakiilada waa inuu buuxiyo shuruudahan:

1. waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay ama qaatay jinsiyadda Somaliland si sharciga waafaqsan.
2. waa inuu muslin yahay kuna dhaqmo diinta Islaamka.
3. waa inaan da'diisu ka yarayn 35 sano sanadka doorashada la qabanayo.
4. waa inuu jidh ahaan iyo caqli ahaanba gudan karo xilkiisa.
5. waa inuu leeyahay aqoon dugsi Sare ama wax u dhigma ugu hoosayn.
6. waa inuu yahay xilkas, akhlaaqdiisa iyo dhaqankiisuna toosan yihiin.
7. waa inaanu ku dhicin xukun ciqaabeed oo kama dambays ah shantii sano ee u dambeeyay.
8. waa inuu saxeexay qoraal uu shakhsi ahaan ku cadaynayo musharaxnimadiisa doorashada iyo inuu u hogaansamayo shuruucda doorashada iyo kuwa anshaxa.
9. waa inuu bixiyey deebaajiga mushaxnimo ee ku waajibay.

### Qodobka 16aad
### Soo Gudbinta Liiska Musharaxiinta

1. Gudoomiyaha ama Xoghayaha Guud ee xisbiga ayaa Liiska murashaxiinta xisbiga ee doorashada Golaha Wakiilada oo gobolaysan u soo gudbinaya xafiiska Komishanka 6da saac ee galabnimo maalinta 60aad doorashada ka hor, waana in si cad loogu soo muujiyaa magaca musharaxa oo afaran, da'diisa iyo gobolka uu ka tartamayo. Haddii ay jiraan musharaxyo isku magacyo ah waa in la sheego naanaysta (haddii ay jitro) iyo magaca oo afaran.
2. Liisaska musharaxiinta xisbiga marka loo gudbinayo komishanka waxa la soo raacinayaa:-
   a. Caddeymaha caafimaadka, dambi la'aanta, waxbarshada, shaqo ka tegidda (hadday jirto), iwm.
   b. Liisasku waa in ay yihiin min 4 nuqul oo ay si wanaagsan uga muuqato astaantii xisbigu.
   c. Caddeyn uu bixiyey murashax kastaa oo uu ku muujiyey inuu ogol yahay murashaxnimada iyo inuu u hogaansamayo xeerka & anshaxa doorashada.
   d. Go' aanka guddiga fulinta xisbigu ku ansixiyey Liiska musharixiinta.

e. Rasiidhada bixinta deebaajiga murashaxnimo ee Wasaaradda Maaliyadda.

3. Khilaaf kasta oo ka dhasha xulista ama soo gudbinta liiska murashaxiinta oo ka dhex dilaaca xisbi gudahiisa waxa go' aan ka gaadhaya Guddiga Fulinta xisbiga arrintu khusayso.

## Qodobka 17aad

## Hubinta Musharaxiinta

1. Hogaanka Xisbiga waxa ku waajib ah in ay si wadaniyad leh u fanidaan musharaxiinta marka ay xulayaan. Iyagoo hubinaya inay buuxinayaan shuruudaha aasaasiga ah ee xeerku jideeyay, isla markaana masuuliyadda ay u tartamayaan si haboon u gudan karaan, magac iyo milgona u soo jiidi karaan xisbiga iyo qarankaba.
2. Komishanku waa inay dhinacooda si madax banaan qof qof ugu hubiyaan musharixiinta loo soo gudbiyay inay shuruudaha buuxinayaan. Haddii Komishanku ku qanco in xubin ama xubno liiska ka mid ahi aanay buuxinayn shardi ama shuruudaha, waxay muddo 3 cisho gudahood ah ku ogaysiinayaan xisbigii u soo gudbiyey inuu muddo loo cayimay ku soo dhamaytiro shuruudaha dhiman ama bedelkiisa ku keeno.

## Qodobka 18aad

## Astaamaha Liisaska Musharaxiinta

1. Astaamaha liisaska musharixiinta ee xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.
2. Xisbina waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi kale hore ugu isticmaalay doorasho.
3. Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga xisbiga, hase yeeshee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo.

## Qodobka 19aad

## Dhawrsanaanta Musharaxinta

Musharixiinta u taagan doorashada Golaha Wakiilada ee Komishanku faafiyey musharaxnimadooda lama xidhi karo mudada doorashadu socoto. Haddii aan la qaban iyagoo faraha kula jira dembi ciqaabtiisu gaadhayso 3 sano oo xadhig ah iyo ka badan.

## Qodobka 20aad

## Faafinta Liisaska Musharaxiinta

1. Komishanka waa inay daabacaan liisaska musharixiinta gobol kasta, iyagoo si bayaan ah u kala muujinaya astaamaha xisbiyadooda .
2. Komishanku goob kasta oo cod-bixineed waa inay gaadhsiiyaan nuqulada liisaska musharixiinta gobolka si loogu dhajiyo dhamaan goobaha cod-bixinta gobolkaas.
3. Komishanka iyo xafiisyadiisu waa inay 45 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta si rasmi ah u faafiyaan Liisaska musharixiinta xisbiyada, iyagoo adeegsanaya warbaahinta kala duwan; isla markaana ku dhaqaaqaya sifa kasta oo ay ku xaqiijinayaan in shacbigu meel kasta oo ay ku sugan yihiin ay si haqab la'aan ah uga bogan karaan liisaska musharixiinta tartamaya.

## Qodobka 21aad

## D e e b a a j i

Musharixiinta u tartamaya xubinimada Golaha Wakiilada waxay bixinayaan deebaaji aan celin lahayn, oo dhan Sl.Sh. 1,000,000 (hal milyan shillin) oo lagu bixinayo xafiiska cashuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

## Qaybta IV
## OLOLAHA DOORASHADA

### Qodobka 22aad
### Bilowga iyo Dhamaadka Ololaha Doorashada

Ololaha doorashadu wuxuu bilaabmayaa marka Komishanku 30 maalmood ka hor maalinta cod-bixinta ku dhawaaqo fasaxa ololaha doorashada, waxaanu dhamaanayaa 24 saac ka hor taariikhda la qabanayo cod- bixinta.

### Qodobka 23aad
### Qabashada Banaan-Baxyada

1. Masuuliinta Axsaabta ee qabanqaabinaya banaan-baxyada ololaha doorashada waa inay qoraal ku ogeysiiyaan Duqa magaalada 48 saacadood ka hor wakhtiga la samaynayo.
2. Duqa magaaladu wakhti kale ayuu u cayimi karaa haddii laba banaanbax ama ka badan isku maalin laga codsado, sidoo kale, wuu joojin karaa in la sameeyo banaan-baxyo, haddii uu ku qanco in waxyeelo loo gaysanayo caafimaadka, anshaxa, ama nabadgelyada guud iwm, waxaana ku waajib ah inuu amro in banaan-baxyadaas lagu qaban karo meel uu tilmaamay ama wakhti uu cayimay.
3. Magaalo ama tuulo laguma wada qaban karo maalin qudha wax ka badan hal banaan-bax.

### Qodobka 24aad
### Muuqaalka Boodhadhka

Ma banaana in boodhadhka iyo waraaqaha ololaha doorashooyinka lagu dhejiyo masaajidada, xafiisyada & gaadiidka dawladda, xarumaha diblomaasiyiinta shisheeye & ururada caalamiga ah iwm

### Qodobka 25aad
### Anshaxa shirarka iyo Banaan-Baxyada

Shirarka iyo banaan-baxyada ololaha doorashada ee Xisbiyadu ku raadinayaan taageerada cod-bixiyayaasha waxa ka reebban:

1) In loo qaato HUB iyo lebbis ciidan ama wax u eeg.
2) in ololaha ama banaan-baxa lagu sameeyo agagaarka meelaha xurmada mudan sida masaajidada iyo goobaha aanay ku haboonayn sida dugsiyada, cusbitaalada, iwm.
3) in lagu tiraabo hadalo ama lagu soo bandhigo muuqaalo wax loogu dhimayo dhaqanka, diinta, nabadgelyada iyo xasiloonida guud iwm ama sidoo kale lagu dhaawacayo qabiil, degaan iwm.
4) in xisbi ama musharax u adeegsado hantida qaranka sifa kasta ha lahaatee.

### Qodobka 26aad
### Isticmaalka Hantida Qaranka.

1) Axsaabta qaranku si siman ayay u isticmaalayaan warbaahinta dawladda iyo fagaarayaasha Khayriyaddaha mudada ololaha doorashadu socoto. Komishanka ayaa kaltanka saacadaha u qaybinaya iyaga oo tala gelinaya Axsaabta iyo W/Warfaafinta.
2) waxa reeban in xisbina si gaar ah ugu takri falo dhaqaalaha qaranka.
3) waxa kale oo reeban in xisbina si dadban iyo si toos ahba u isticmaalo dhaqaale shisheeye oo ay ka mid yihiin NGO –yada shisheeyaha ah iyo Haya'daha UN-ka.

### Qodobka 27aad
### Dhaqdhaqaaqa Gaadiidka Maalinta Doorashada

1. Guud ahaan dalka JSL dhaqdhaqaaqa gaadiidka dawladda iyo kan dadweynaha (public transport/Govt.) wuu reeban yahay maalinta cod-bixintu socoto laga bilaabo 6da saac ee subaxnimo ilaa 8da fiidnimo, marka laga



9.

M.M. Dubbe

reebo gaadiidka lagamamaarmaanka ah, sida nabadgelyada: dhooliyada (ampullance), booyadaha biyaha, wiishashka nalka, iwm. kuwaas oo fasax dhaqdhaqaaq la siin doono.

2. Gaadiidka hawl-wadeenada doorashada iyo madaxda Axsaabta waxa komishanku siinayaa fasax dhaqdhaqaaq iyo astaan gaar ah oo lagu aqoonsado.
3. Komishanku wuxuu dadweynaha warbaahinta uga tebinayaa todobaad ka hor amarka xayiraada dhaqdhaqaaqa gaadiidka maalinta cod-bixinta. Iyadoo gaadiidka ku xadgudba qodobkan la qabanayo sharcigana la horgaynayo.

**Qodobka 28aad**
**Wakiilada Axsaabta**

1. Guddiyada fulinta xisbiyadu waxay min 2 wakiil oo leh xaqa cod-bixinta u soo diran karaan goob kasta oo cod-bixin ka dhacayso oo ay musharaxiin ku leeyihiin iyo xafiisyada doorashada ee gobolada, degmooyinka iyo qarankaba. Waxa kale oo ay keeni karaan bedelkooda haddii ay maqnaadaan.
2. Wakiilada ay axsaabtu soo dirsadaan waa inay ku sugnaadaan goobahooda xilliyada hawsha doorashadu socoto, soona jeediyaan wixii tabasho ama caddeyn ay qabaan (haddii ay jirto), taas oo la diiwaangelinayo.
3. Magacyada wakiilada xisbiyada waa in loo geeyo Komishanka ama xafiisyadiisa 21 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Komishanka ama xafiisyadiisu wuxuu siinayaa wakiil kasta aqoonsi ama qoraal ogolaansho ah oo u fasaxaya inuu geli karo kana hawl geli karo goobta cod-bixinta ama xafiiska doorashada ee loo soo diray.

**Qodobka 29aad**
**Shuruudaha Wakiilka Xisbiga**

Wakiilada xisbiyaddu u soo magacaabaan goobaha cod-bixinta iyo xafiisyada doorashada waa inay buuxiyaan shuruudahan:

1. waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay.
2. waa in aan da' diisu ka yarayn 25 sano sanadka doorashada la qabanayo.
3. waa inuu wax qori karo waxna akhriyi karo
4. waa inuu yahay qof xilkas ah oo dhaqan toosan.
5. waa in komishanku u tababaraa hawsha wakiilnimada.

**Qaybta V**
**DIYAAR-GARAWGA IYO MAAMULKA DOORASHADA**

**Qodobka 30aad**
**Tirada Xubnaha Komishanka**

Iyadoo laga duulayo waaya-aragnimadii laga kasbaday doorashooyinkii hore iyo baaxadda hawsha komishanka Doorashoooyinku u xilsaaran tahay, lana tixgelinayo cabashooyinka Axsaabta Qaranku ka soo jeediyeen liil-tirka hawsha doorashada, waxa lagamamaarmaan noqotay in la kaabo waxna laga bedelo qodobka 11aad, faqradiisa 1aad ee Xeerka 20/2001. Sidaa darted, waxa lagu kordhiyey faqrad cusub oo u dhigan sidan:

1. Komishanka Qaranka ee doorashooyinku waxa lagu kordhiyey laba (2) Xubnood oo kale. Kuwaas oo ay soo kala xulayaan:
   a) Hal, Xisbiyada Mucaaridka ah ayaa soo xulaya.
   b) Halka kalena Madaxweynaha, ayaa soo xulaya. Golaha wakiilada ayaana Ansixinaya.

## Qodobka 31aad

### Jadwalka Hawlgalka Doorashada

1. Iyadoo aan waxba loo dhimayn waajibaadyada iyo awoodaha Komishamka ee uu tilmaamay Xeerka Doorashooyinka (Xeer No. 20/2001), waxa kale oo ku waajib ah inay si rasmi ah u soo saaraan jadwal mudaysan oo ay si cad ugu muujinayaan qorshaha hawlgalkooda. Kaas oo ay nuqulo ka mid ah u dirayaan Axsaabta, isla markaana ku faafinayaan warbaahinta kala duwan.
2. faafinta jadwalka ka dib, haddii Komishanku lagamamaarmaan u arko wax ka bedelka meelo ka mid ah qorshaha hawlgalka waa inuu axsaabta sidaa ku wargeliyo isla markaana warbaahinta ka sheego isbedelkaas

## Qodobka 32aad

### Hawl-Wadeenada Doorasbada

iyadoo aan waxba loo dhimayn arrimaha ay tilmaamayaan qodobada 19aad_& 20aad ee Xeerka. Doorashooyinka (Xeer No. 20/2001), ee ku saabsan hawl-wadeenada, waxa Komishanka ku waajib ah:

1. in si qoto dheer u hubiyaan hawl-wadeenada ay ku aaminayaan masuuliyada culus ee doorashada inay yihiin kuwa xilkas ah oo gudan kara hawsha loo xilsaaray.
2. in ay siiyaan tababar ku filan, isla markaana hubiyaan inay si hufan hawshooda u gudan karaan, inta ka horaysa maalinta cod-bixinta.
3. in xafiisyada doorashada iyo kormeerada u diyaariyaan gaadiidka shaqo lagu fulin karo iyo isgaadhsiin.
4. Komishanku waxay awood u leeyihiin inay kordhiyaan tirada hawl-wadeenada goobaha cod-bixinta, degmada iyo gobolka, haddii baahidaasi u muuqato.

## Qodobka 33aad

### Qandaraasyada Agabka iyo Adeegyada Doorashada

1. Si looga fogaado musuqmaasuq, danaysi iyo cadaalado daro, Komishanku waa inuu qandaraas loo siman yahay ku bixiyaa agabka iyo adeegyada doorashada ay ku fulinayaan.
2. cidda qandaraaska ku guulaysata komishanku wuxuu la galayaa heshiis mudaysan oo lagu cadaynayo sifaha qandaraaska, mudada lagu keenayo iyo wakhtiga iyo sida loo bixinayo lacagta, iwm.
3. waxa reeban in xubnaha Komishanka ama qoysaskooda iyo meheradahoodu qaataan qandaraasyada ay bixinayaan iyo inay sifa kale kaga faa'iidaystaan xilalkooda.

## Qodobka 34aad

### Qalabka/Agabka Xafiisvada Doorashooyinka

Komishanka Qaranka ee doorashooyinku waa inay goob cod-bixineed kasta u diyaarisaa qalabkan/agabkan:

a. Nuqul xeerkan ka mid ah.
b. Xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shaambaddii goobta cod-bixinta oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.
c. Xidhmo lingaxan oo ay ku jiraan waraaqihii cod-bixintu.
d. Buuga diiwaan gelinta.
e. Sanduuq lambaraysan oo warqaddaha cod-bixinta lagu rido.
f. Afar nuqul lagu qoro agabka cod-bixinta.
g. Saddex foom oo lagu qoro hawlgalka cod-bixinta.
h. Foom leh khaanado shaxaysan.
i. Qalimo-biiro casaan ah oo ku filan calamadaynta warqadaha cod-bixinta.

j. Ugu yaraan 5 waraaqadood oo daabacan tusinaya qaabka cod-bixiyayaashu u calaamadaynayaan warqadaha cod-bixinta.
k. Xidhmo shamac ah iyo kabriido loo isticmaalo meelaha aan korontada lahayn ama haddii ay danto.
l. Qalabka qoraalada kala duwan ee loo baahan karo (stationary).
m. 8 Foom oo rasmi ah oo lagu qoro Natiijada codbixinta ooy wada saxeexayaan Gudoomiyaha Goobta iyo 3 Wakiil xisbi.
n. Si aanay u qoyin haddii roob yimaado aqabka yaala goobta codbixinta, waa in loo diyaariyaa baco ama teendhooyin.

## Qodobka 35aad

## Habaynta Qalabka iyo Agabka Doorashada

1. Komishanku waa inay xafiiska doorashada degmo/gobol kasta u diyaarisaa qalabkan:
   a. Nuqul xeerkan ah
   b. Xidhmo lingaxan oo ay ku jirto shambaddii xafiiska degmada ama gobolka ee doorasho oo ay la socdaan khadkii iyo khadeeyihii.
   c. 4 nuqul oo lagu qorayo hawlgalka cod-bixinta xafiiska doorashada degmada ama gobolka.
   d. Foomam shaxaysan (tabulation forms)
   e. Qalabka wax lagu qoro oo kala duwan (stationary)
2. Qalabka xafiis kasta oo doorasho waa in lagu rido saxarad gaar ah. Saxaradda waa in la xidho oo la lingaxo. Komishanku waa inay qalabkaas dirto wakhti ku haboon, iyadoo ay la socdaan sanaadiiqdii codka lagu ridayey oo lambaraysan, waxaana loo dirayaa xafiisyada doorashada gobolada oo u sii gudbinaya kuwa degmooyinka si ay ugu qaybiyaan goobaha cod- bixinta degmadaas.
3. Komishanku waa inay xafiisyadooda degmo/gobol u diyaariso waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah oo ku lingaxan kiishash si loo siiyo xafiiska doorasho ee soo codsada, iyadoo ay waajib tahay in ay soo sababeeyaan codsigooda. waxana waraaqahaas la gudoonsiinayaa gudoomiyaha goobta cod-bixinta.
4. Dhamaan agabka iyo qalabka kala duwan ee loo isticmaalayo doorashada waa in si adag loo xafido, lana diiwaangaliyo goob kasta oo uu yaalo. Iyadoo lagu soo ururinayo xarunta dhexe ee doorashooyinka marka hawshu dhamaato.
5. 5.-7 nuqul oo lagu qorayo natiijada codbixinta degmada oo rasmi ah, ooy wada saxeexayaan 3 wakiil xusbi iyo Guddoomiyaha Goobta oo shaabadaysan.

## Qodobka 36aad

## Waraaqaha Cod-Bixinta

1. Waraaqda cod-bixinta (ballot paper) loo isticmaalayo waxay ka kooban tahay saddex khaanadood oo is le'eg oo si qoton ah (vertical) isu barbar yaala oo kala xidhan. Xisbi kasta waxa uu gaar u yeelanayaa khaanadda ay halka u sareysa kaga daabacan tahay astaanta xisbiga oo kor u taagan si afar gees ah. Astaanta xisbi kasta waxa hoosteeda lagu daabacayaa magacyada musharixiinta xisbigaas ee gobolka uga tartamaya, isla markaana, Magaca musharax kasta waxa hortiisa ku yaala afar geesley banaan oo loogu talagalay inuu cod-bixiyuhu ku muujiyo musharaxa uu codkiisa siinayo. Waraaq kastaana waa inay leedahay cidhif yar oo xabagaysan oo warqadda cod-bixinta lagu lingaxo.
2. Waa in la daabaco waraaqo-cod-bixin oo tusaale ah (speciment) oo ku filan axsaabta, oo aan tirsi taxane lahayn loona qaybiyo xisbiyada xilliga ololaha, si loo gaadhsiiyo ama loo fahansiiyo dadwaynaha habka loo codaynayo.
3. waraaqaha cod-bixintu waa inay noqdaan kuwo leh astaamo qarsoon (hologramed) oo aan la been-abuuri karin, isla markaana waa inay leeyihiin tirsi taxane ah (seriel number).

M. M. [signature]

## Qodobka 37aad

### Qolka Calaamadaynta & Sanduuqa Cod-Bixinta

1. Goob kasta oo codbixinta laga dhiibanayaa waa inay lahaato laba qol oo yar yar oo loogu talagalay in lagu calaamadeeyo waraaqaha cod-bixinta.
2. Sanduuqa waraaqaha cod-bixinta lagu ridayaa waa inuu yaalo meel muuqata oo ka mid ah goobta cod-bixinta, taas oo ay si bayaan ah u wada arki karaan Gudoomiyaha goobta cod-bixinta, hawl-wadeenada goobta iyo wakiilada axsaabtu.

## Qodobka 38aad

### Bandhigidda Liiska Musharixiinta

Liiska magacyada musharixiinta Axsaabta ee daabacan ee gobolkaa ku tartamaya waa in lagu dhejiyo meel la wada arki karo oo ka mid ah xafiiska doorashada ama goobta cod-bixinta horteeda.

## Qodobka 39aad

### Qaybinta Qalabka iyo Agabka Doorashada

1. Komishanku, isagoo ku xisaabtamaya duruuf kasta oo lama-filaan ah oo hakin/xayiri karta gudbinta agabka doorashada, Waa inuu gaadhsiiyo xafiiska doorashada gobolka qalabka loogu talagalay cod-bixinta wakhti munaasib ah. Xafiiska doorashada gobolku waa inuu agabkaas gaadhsiiyo xafiiska doorashada degmada ugu dambayn 10ta subaxnimo maalinta ka horaysa cod-bixinta.
2. Xafiiska doorashada degmadu waa inuu gaadhsiiyo dhamaan goobaha cod-bixintu ka dhacayso ee degmadaas wixii agab ah ee loo baahan yahay ka hor 5:00 saac ee subaxnimo maalinta cod-bixinta.
3. Gudoomiyayaasha goob kasta oo cod-bixineed waxa kale oo loo gudbinayaa:
   a) Nuqul muujinaya magacyada hawl-wadeenada goobta
   b) Nuqul muujinaya magacyada wakiilada axsaabta ee goob-jooga ahaanaya.
   c) Nuqul muujinaya magacyada goob-joogayaasha caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee degaanka ka hawlgalaya.

## Oodobka 40aad

### Diyaargarowga Xafiiska Goobta Cod-Bixinta

1. Gudoomiyaha goobta cod-bixintu markuu helo qalabka ku xusan qodobka kore waa inuu:-
   a) Abaabulo xafiiska oo uu hubiyayaasha iyo xoghaynta goobta u sheego waajibaadyadooda, isla markaana la socodsiiyo sida ay hawsha loo xilsaaray u gudanayaan.
   b) Hubiyo in Wakiilada axsaabta ee loo soo gudbiyay inay goob-joog yihiin.
   c) Markuu hubiyo inay saxaraduhu lingaxan yihiin waa inuu furo saxarada oo hubiyo inay dhan yihiin agabkii , waana inay goob-joog ahaadaan Hawl-wadeenadii goobta iyo wakiiladii axsaabtu.
   d) Markay wadajir u hubiyaan gudoomiyaha iyo hawl-wadeenadiisa iyo wakiilada xisbiyadu in xidhmooyinka ay ku jiraan shaambadda goobta iyo waraaqaha cod-bixintu lingaxan yihiin, waa inuu furo xidhmooyinka oo waraaqaha cod-bixinta la dhaco shaambada goobta, oo si nidaamsan ugu rido weel xafidan. Waxaa reebban inuu markaas joogo qof aan ahayn inta goobta ku qoran.
   e) hubiyo in ogaysiiska tilmaamaha cod-bixinta iyo liisaska murashaxiintu ku dhegan yihiin meelihii loogu talagalay.

f) hubiyo in qalabkii loo baahnaa ee cod-bixinta loogu talagalay loo agaasimay sida xeerku tilmaamayo, si hawsha doorashu si hufan ugu hirgasho.

2. Waa inuu xoghaynta faro inuu diiwaan-geliyo dhamaan hawlgalka kor ku xusan in la fuliyey. Qoraalka waa inay ku cadaato shaambadda goobta, tirada waraaqaha cod-bixinta ee goobta cod-bixintu heshay iyo buugii diiwaangalinta.
3. Waa inuu markaa ka saxeexo hawl-wadeenada iyo wakiiladaba in wax waliba sidii loogu talagalay yihiin.
4. Markuu hubiyo Gudoomiyaha goobta cod-bixintu in hawshaasi qabsoontay waa inuu ku dhawaaqo in cod- bixintu furan tahay.

## Qodobka 41aad

## Awoodda Gudoomivaha Goobta Cod-Bixinta

1. Gudoomiyaha goobta cod-bixinta waxa waajib ku ah inuu ilaaliyo nidaamka inta doorashadu socoto. Booliska ayuu ku amri karaa inuu qof goobtaa dibedda uga saaro ama in la qabto qof gef ku sameeyay hawsha doorashada ama qof waali ka muuqato.
2. Booliska looma ogola inuu galo gudaha goobta cod-bixinta haddii aanu Gudoomiyuhu amrin.
3. Haddii ay timaado xaalad lama filaan ah oo wax u dhimi karta habsami u socodka doorashada Gudoomiyaha goobtu wuxuu awood u leeyahay inuu qaato go'aan ku meel gaadh ah oo uu ku xalinayo dhibaatada taagan, isagoo go'aankaas qoraal ahaan u diiwaangelinaya, una gudbinaya xafiiska doorashada degmada.
4. Saraakiisha Booliska iyo kuwa shaqaalaha dawladda waa in ay fuliyaan codsiyada Gudoomiyaha goobta si loo hubiyo in si dhib yar codka loo bixiyo oo aanay u dhicin in lagu ururo miiska hawl-wadeenada ama goobta cod-bixinta agagaarkeeda.
5. Gudoomiyaha goobta cod-bixintu wuxuu xaq u leeyahay inuu isticmaalo awoodaha ku qoran xubnaha qodobkan.

## Qodobka 42aad

## Nidaamka Goobta Cod-Bixinta

1. Goobta cod-bixinta waxa geli kara hawl-wadeenada goobta ka shaqaynaya, wakiilada axsaabta iyo codbixiyayaasha codkooda dhiibanaya.
2. Ma banaana in hub lala yimaado goobta cod-bixinta, marka laga reebo ciidanka amniga ee goobta ka shaqaynaya.
3. Cod-bixiyayaashu waxay isu taagayaan safaf, markiibana hal qof oo keliya ayaa gelaya qolka calaamadaynta, iyadoo loo kala hor marinayo sidii loo soo kala horeeyay, hasa yeeshee waa 1a tixgelin karaa inuu ugu hormaro haddii ay jirto qof xaalad gaar ah loo tixgeliyay ama ka shaqaynaya hawsha doorashada oo doonaya inuu codkiisa bixiyo.

## Qodobka 43aad

## Cod-Bixiyayaasha aan Codka Dhiiban Karin

1. Waxa codkiisa dhiiban kara cod-bixiyaha taga goobta cod-bixinta oo codkiisa ku ridi kara sanduuqa.
2. Haddii uu jiro qof ay naafonimo ama da' ama sabab kale u diidey inuu codkiisa bixiyo kuna sugan goobta codbixinta Gudoomiyaha goobta cod-bixinta ayaa u calaamadinaya iyagoo ay goob jog ka yihiin muraaqibiinta xisbiyadu.
3. Xoghayaha goobta cod-bixinta ayaa diiwaangelinaya gelinaya sababta loo ogolaaday in qofkaas laga kaalmeeyo sidii uu codkiisa u bixin lahaa, waxa kale oo uu qoraalka ku muujinayaa magacyada qofkaas iyo qofka kaalmeeyey.

## Qodobka 44aad

## Habka Cod-Bixinta

1. Markuu dhamaado hawlgalka ku xusan qodobka 40 iyo 42aad, Gudoomiyaha goobta cod-bixinta wuxuu cod- bixiyaha siinayaa warqaddii cod-bixinta oo lagu dhuftay shaambaddii goobta, isla markaana laga reebay dabadii hadhaaga ahayd ee warqaddu ku taalay.

2. Markaa cod-bixiyuhu wuxuu gelaya qolka yar ee uu warqadda ku soo calaamadinayo, kuna soo xidhanayo.
3. Cod-bixiyuhu wuxuu ka calaamadinayaa warqadda cod-bixinta meel ka mid ah afar geesta banaan eek u hor taala magaca musharaxa uu codka siinayo, asagoo isticmaalaya qalin-biro casaan ah oo uu siinayo xoghayaha goobtu. Ka dib warqaddii wuu soo laabayaa. isagoo ku xidhaya dacalkii yaraa ee xabagta lahaa waxanu ku ridayaa sanduuqii loogu talagalay cod-bixinta.
4. Markuu cod-bixiyuhu warqaddiisa ku rido meesha daloosha sanduuqa, waa inuu goobta ka baxo, waxase ka horaysa inuu Gudoomiyaha goobtu hubiyo in ay si fiican uga muuqato khadkii codayntu.
5. Haddii cod-bixiyuhu arko in warqadda la siiyey aanay dhamayn ama dhaawac qabto inta aanu codka bixin, waa inuu soo celiyo oo Gudoomiyaha goobta weydiisto mid fayow. Arrintaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.
6. Gudoomiyaha goobtu wuxuu xaq u leeyahay inuu goobta ka saaro isla markaana ka qaado warqadda codbixinta, cod-bixiye kasta oo cudur-daar la'aan goobta ku daaha. waxana mar kale loo ogolaan karaa inuu codkiisa dhiibto markay dadkii kale ee goobta ku sugnaa ee codkooda dhiibanayey ay dhamaadaan.
7. Haddii cod-bixiye lagu helo inuu sito waraaqo cod-bixineed oo dheeraad ah ama kuwo ka duwan kuwa codka lagu bixinayo ama inuu hore codkiisa u soo dhiibtey, Gudoomiyaha goobtu waa inuu si degdeg ah u amro in la qabto oo booliska u dhiibo si maxkamad loo horgeeyo, Arintaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan- geliyo.
8. Warqad kasta oo codbixineed waxay waajib ku tahay guddoomiyaha goobta iyo saddexda wakiil xisbi inay hubiyaan inay shaabadaysan tahay.

## Qodobka 45aad

## Wakhtiga Hawlgalka Cod-Bixinta

1. Hawlgalka cod-bixintu waa in lagu dhamaystiro hal maalin gudaheed oo ka bilaabmaysa 6:00 saac ee subaxnimo kuna dhamaanaysa 6:00 saac ee fiidnimo. Hasayeeshee, hawl-wadeenada doorashada iyo wakiilada axsaabta waxa ku waajib ah inay goobahooda shaqo ku sugnaadaan saacad ka hor wakhtiga codbixintu bilaabmayso.
2. Cod-bixintu way soconaysaa oo wakhtiga xidhitaanka coddaynta la tixgelin maayo, haddii ay jiraan cod-bixiyayaal safka ku jira oo aan welli codkooda bixin ilaa ay ka dhamaanayaan cod-bixiyayaasha markaas safta taagan.

## Qodobka 46aad

## Cabashooyinka Goobta Cod-Bixinta

Gudoomiyaha goobta cod-bixintu waa inuu qaraar ka gaadho cabashooyinka iyo wixii muran ah ee ka dhasha hawlgalka goobta cod-bixinta (haddii ay jiraan). kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwa af ahaan ama qoraal ahaan loo soo jeediyey. Cabashooyinka iyo muranadaas waa in qoraal ahaan loo diiwaan-geliyo.

## Qodobka 47aad

## U diyaar-Garowga Tirinta Codadka

1. Marka Cod-bixiyayaashii safka taagnaa wada codeeyaan, Gudoomiyaha goobtu wuxuu cod Sare ku sheegayaa inay cod-bixintu xidhan tahay.
2. Gudoomiyaha goobtu markuu hubiyo in hawlwadeenadii goobta iyo wakiiladii axsaabtuba goob-joog yihiin wuxuu ka ururinayaa miiska dhamaan waraaqaha iyo qalabka aan tirinta codadka wax ahmiyad ah u lahayn, wuxuu bilaabayaa hawsha soo socota:
   a) Wuxuu hubinayaa tirada guud ee cod-bixiyayaasha, isagoo isu eegaya tirada waraaqaha cod bixinta ee la isticmaalay iyo tirada cod-bixiyayaasha diiwaanka ku qoran.
   b) Wuxuu ururinayaa oo tirinayaa waraaqaha cod-bixinta ee aan la isticmaalin waxaanu ku ridayaa baqshadda 1aad.



15

c) Wuxuu hubinayaa tirada waraaqaha cod-bixinta ee xumaaday ee ay soo celiyeen cod-bixyayaashu, ama la arkay inay xun yihiin, waxaanu ku ridayaa baqshada 2aad.
d) Gudedoomiyaha Goobta codbixinta iyo saddexda wakiil xisbi iyo madaxda nabadgelyadu waxay wada saxeexayaan buuga diiwaan gelinta goobta kuna cadeeyaan inay si nabadgelyo ah u dhacday una xidhantay.

## Oodobka 48aad
## Habka Tirinta Cod-Bixinta Goobta

1. Marka Gudoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha diyaargarawga ee ku xusan qodobka 47aad, wuxuu bilaabayaa tirinta waraaqaha cod-bixinta ee sanduuqa ku jira. Si taa loo fuliyo; Hubiyuhu wuxuu markiiba sanduuqa ka soo saarayaa hal warqad cod-bixineed, wuxuuna u dhiibayaa Gudoomiyaha goobta, Gudoomiyuhuna wuxuu furayaa warqaddii codbixinta oo cod sare ku sheegayaa xisbiga/musharaxa codka lagu siiyey; warqadaas waxa hubiyuhu u sii gudbinayaa Hubiyaha kale oo isna tusi doona wakiilada Xisbiyada, markaas xoghayaha ayaa gelinaya foomka shaxaysan ee loogu talagalay xisbiga codkaas helay waxaanu warqadaas ku ridayaa weel xafidan oo calaamadda xisbiga leh.
2. Ma banana in sanduuqa laga soo saaro warqad kale oo cod-bixineed inta tii ka horaysay laga dhamaynayo ee weelka lagu ridayo. Hawsha waxa maamulaya hawl-wadeenada goobta oo keliya. Hasa yeeshee, wakiilada Axsaabtu waxay si fiiro leh ula soconayaan hawlgalka tirinta, iyagoo hubinaya codadka.
3. Gudoomiyaha goobtu markuu dhameeyo tirinta, wuxuu hubinayaa tirada waraaqaha cod-bixinta, iyo inay is keenayaan tirada codadka axsaabtu guud ahaan heleen iyo cod-bixiyayaasha diiwaanka ku qoran. wuxuu intaas raacinayaa tirada codadka lagu muransan yahay ama xumaaday ee waxba kama jiraan loo aqoonsadey.
4. Gudoomiyaha goobtu markuu hawshaas dhameeyo, wuxuu waraqadaha xumaaday ama waxba kama jiraanka laga soo qaadey ama/iyo kuwa muranku ka taagan yahay iyo waraaqaha cabashada iyo dacwooyinka ku ridayaa baqshadda 3aad.
5. intaa dabadeed, Gudoomiyaha goobtu wuxuu ugu dambeyntii waraaqihii cod-bixinta ee la tiriyey ku ururinayaa baqshadda 4aad, iyagoo kala soocan

## Qodobka 49aad
## Xidhitaanka Hawsha Tirinta

1. Markuu Gudoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha tirinta ee ku xusan qodobka 48aad wuxuu ku dhawaaqayaa wadarta tirada cod-bixiyayaasha, codadka ansaxay, kuwa xumaaday iyo tirada codadka uu helay xisbi kasta .
2. Intaa dabadeed, Baqshadaha waa la lingaxayaa, korkana waxa lagaga dhufanayaa shaambaddii goobta, waxaana korka wadajir uga saxeexaya Gudoomiyaha goobta, ugu yaraan hal hubiye iyo wakiilada xisbi kasta oo murashaxiin ku leh goobta-codbixinta.
3. Iyadoo laga taxadirayo inaan la lumin codadka muwaadiniinta, haddii wakiil xisbi si kas ah u diido ama ka hakado ama muran geliyo inuu saxeexo natiijada goobta waxa lagu kaaftoomi karaa saxeexa laba wakiil xisbi iyo hawlwadeenada goobta. waxna u dhimi mayso sharcinimada hawsha, hasa yeeshee cabashadiisa waa loo diiwaan gelinayaa.
4. Haddiise laba wakiil iyo ka badan saxeexi waayaan cabasho darteed waxa cabashadaas loo gudbinayaa muddo aan ka badnayn 12 saacadood xafiiska doorashada degmada si uu go'aan uga gaadho. Arrintaasna waa la diiwaangelinayaa.
5. Baqshadaha korkooda waxa lagu qorayaa faahfaahinta waxa baqshadda gudaheeda ku jira.
6. Hawsha tirinta waa in loo dhamaystiro si isdaba jooga ah ee la soo tilmaamay oo hakad lahayn oo wax kale aan la dhex galin inta laga dhamaystirayo.

7. Qoraalada raadraaca (records) waa in si cad loogu muujiyo hawlaha kor ku xusan, iyadoo wakiil xisbi kastaa qaadanayo nuqul ka mid ah foomamka natiijada goobta codbixinta oo wada saxeexan shaabadaysana.

## Qodobka 50aad

## Codadka Xumaada ama/iyo kuwa Lagu Muransan Yahay

1. Waraaqaha cod-bixinta marka la tirinayo waxay noqonayaan waxba kama jiraan:
   a. Haddii ay ka duwan yihiin wara aqaha cod-bixinta ee Komishanku gartay in doorashada loo isticmaalo.
   b. Haddii aanay ku oollin shaambadda goobta cod-bixinta.
   c. Haddii warqaddu dhaawacan tahay oo aanay dhamaystimayn
   d. Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqdaan qoraal ama calaamado ama raad aan loogu talagelin in lagu qoro.
   e. Haddii warqadda cod-bixinta aanay si fiican uga muuqan oo la aqoonsan kari waayo xisbiga/musharaxa codka la siiyay.
   f. Haddii warqadda cod-bixinta ay ka muuqato in cod-bixiyuhu calaamadeyay astaan hal xisbi/musharax wax ka badan.
   g. Warqadaha cod-bixinta ee waxba kama jiraan loo aqoonsado ee farqadani tilmaantay (a – f) laguma darayo tirada codadka ansaxay, axsaabtana loo tirin maayo.
2. Codka waxba kama jiraan wuxuu noqon karaa marka go'aan wadajir ah isku raacaan Hawl-wadeenada goobta cod-bixintu. Haddiise ay isku raaci waayaan oo ay ku kala qaybsamaan, waxa waraaqahaas cod- bixineed loo aqoonsanayaa kuwo muran ka taagan yahay.
3. Xafiiska Doorashada ee degmada ayaa qaraar ka gaadhi kara waraaqaha cod-bixinta ee muranku ka taagan yahay.

## Qodobka 51aad

## Qoraalka Raad-Raaca Goobta Cod-Bixinta

1. Qoraalka raadraaca ee goobta cod-bixinta waxa lagu qorayaa foomam loogu talagalay oo 8 sideed nuqul ah, kaas oo Komishanku u soo diyaariyey.
2. Laba nuqul oo qoraalka raadraaca ka mid ah waa in lagu rido saxaradda oo la raaciyo baqshadaha lingaxan ee ku xusan qodobka 49aad oo loo gudbiyo xafiiska doorashada degmada, nuqulka saddexaad waa in loo gudbiyo Gudoomiyaha xafiiska doorashada ee gobolka, iyadoo la raacinayo wixii ka hadhay agabkii doorashada ee kala duwan
3. 5ta nuqul ee qoraalka raad-raacxa ka hadhay waxa loo qaybionayaa 3da wakiil xisbi , hal nuqul oo xarunta dhexe ee kumishinka qaranka, nuqulka kalena Maxkamadda sare.

## Qodobka 52aad

## Qaadista ivo Wareeiinta Qalabka/Agabka

1. Gudoomiyaha goobta cod-bixinta oo ugu yaraan ay la socdaan xubin hawlwadeenada ka tirsan iyo Boolis ilaalo ah, iyo wakiilada xisbiyada ayaa qaadaya qalabka, qoraalka raadraac iyo baqshadaha goobta kuna wareejinaya xafiiska doorashada ee degmada, muddo aan ka badnayn 12 saacadood.
2. Marka xafiiska doorashada ee degmada lagu wareejinayo qalabka iyo baqshadaha waa in la hubiyo inay lingaxan yihiin oo aan la furin lana farafarayn. Gudoomiyaha doorashada ee degmadu waa inuu bixiyo caddaynta la wareegidda agabkaas iyadoo ay goob jog ka yihiin wakiilada Xisbiyadu.
3. Gudoomiyaha doorashada ee degmaddu wuxuu u gudbinayaa baqshadaha natiijadda cod-bixinta doorashada Golaha Wakiilada oo lingaxan iyo nuqul ka mid ah qoraalka raadraaca Gudoomiyaha xafiiska doorashada gobolka.
4. Saddex nuqul ooqoraalka raadraaca ahna waxa la siinayaa wakiilada xisbiyadda ee heer degmo.

5. laba nuqula waxa loo kala dirayaa xafiiska Kumishinka iyo maxkamadda sare

**Oodobka 53aad**

**Hawsha Xafiiska Doorashada ee Degmada**

Markuu Gudoomiyaha xafiiska doorashada ee degmadu helo agabka lagu tilmaamay qodobka 52aad ee xeerkan:

a. Waa inuu faro hubiyayasha, xoghayaha iyo tiriyayaasha inay hawshooda u diyaar garoobaan.
b. Waa inuu u yeedho wakiilada axsaabta, kuna wargeliyo inay goob-joog ahaadaan inta hawshu socoto.
c. Markay Gudoomiyaha, hawlwadeenada iyo Wakiiladu wadajir u hubiyaan in baqshaduhu lingaxan yihiin oo aan hore loo furin, waa inuu furaa baqshadda ay ku jirto shaamnbadu oo hubiyaa in-lambarka shaambadu ku yaal qoraalada.
d. waa inuu hubiyo in qoraalada iyo baqshadaha ku xusan qodobada , 49aad, 51aad ee xeerkan ay dhan yihiin.
e. Waa inuu hubiyo oo isu geeyo dhamaan cod-bixinta ka soo hoyatay goobaha cod-bixinta degmada.
f. Waa inuu hubiyo oo isugeeyo dhamaan warqadaha cod-bixinta ee aan la isticmaalin.
g. Waa inuu hubiyo oo isugeeyo dhamaan codadka waxba kama jiraanka noqday ee ka soo hoyday goobaha cod-bixinta degmada.
h. Waa inuu qaraar ka gaadho codadka muranku ka taagan yahay, ee uu tilmaamay qodobka 50aad ee xeerkan.
i. Waa inuu isu geeyo wadarta codadka xisbi kasta ka helay cod-bixinta degmada oo dhan.
j. Waa inuu natiijada codadka degmada ee soo baxay iyo cabashooyinka ama/iyo dacwadaha (haddii ay jiraan) u gudbiyo Gudoomiyaha Xafiiska doorashada gobolka

**Qodobka 54aad**

**Hawsha Xafiiska Doorashada ee Gobolka**

1. Xafiiska doorashada ee gobolku markuu helo nuqulada qoraalada raadraaca goobaha cod-bixinta iyo natiijada codadka ka soo baxay degmooyinka gobolka iyo inta xisbi kasta ka helay ee ay u soo gudbiyeen xafiisyada doorashada ee degmooyinka gobolku wuxuu si dhugmo leh xisaab ahaan u hubinayaa saxnaanta natiijooyinka codadka degmooyinka gobolka.
2. hawlgalka faqradda 1aad ee qodobkan ka dib, waa in uu isu geeyo codadka musharax kasta helay, isagoo xisbi kasta gaarkiisa u eegaya.
3. Guddoomiyaha xafiiska doorashada ee gobolku markuu ku qanco wuxuu hawgalka ka samaynayaa raad raaca lagu qorayo foomam loogu talgalay oo lix nuqul ka kooban, wuxuuna laba nuqul oo ka mid ah u gudbinayaa xafiiska dhexe ee doorashooyinka (Komishanka) kan asliga ahna (original) Maxkamadda. sare ee dalka.
4. saddex nuqul ee hadhayna saddexda wakiil xisbi ee heer Gobol.

**Qodobka 55aad**

**Soo Saaridda Natiiiada Hordhaca ah ee Doorashada**

Gudoomiyaha Xafiiska doorashada ee gobolku, -iyadoo uu goob-joog yahay xubinta Komishanka Qaranka gobolka uga hawlgashay- waa inuu si hordhac ah u soo saaro natiijada doorashada Golaha Wakiilada ee gobolka, taas oo uu ku soo bandhigayo qoraal kooban oo ay ku muujisan yihiin wadarta guud ee codadka ansaxay ee gobolka iyo tirada xisbi kasta iyo musharax kasta gaarkiisa ka helay cod-

bixinta gobolka . Nuqul qoraalkaas ka mid ahna waa inuu u gudbiyo xafiiska dhexe, iyo wakiilada xisbiyada

**Qodobka 56aad**

**Gudbin Raad-Raac (Records)**

1. Raadraacyada hawlgalada ku xusan qodobada 49aad, 51aad iyo 54aad ee xeerkan waxa lagu qorayaa foomamka Komishanku u diyaariyey mid kasta, waana inay ahaadaan min lix nuqul ugu yaraan.
2. Nuqulada raadraacyada (records) waxaa loo kala qaybinayaa sida ay tilmaamayaan qodobada 51aad iyo 54aad ee xeerkan.

**Qodobka 57aad**

**Hawsha Xafiiska Dhexe ee Doorashada**

1. Komishanku wuxuu si feejigan ula soconayaa dhamaan hawlaha doorashada saameeya, isla markaana wuxuu si aan dib u dhac lahayn uga jawaabayaa adeegyada ay soo codsadaan xafiisyada doorashada ee degmooyinka/gobolada iyo xaaladaha kale ee gurmad iyo go'aan ka gaadhis u baahan.
2. Komishanku markuu helo qalabka & qoraalada raadraaca ee ku xusan qodobka 55aad ee xeerkan, waa:
   a. inuu faro hawlwadeenada inay u diyaaar-garoobaan hawsha
   b. Inuu u yeedho Wakiilada axsaabta si ay goob-joog u ahaadaan marka hawshu socoto.
   c. Inay wadajir u hubiyaan in baqshaduhu lingaxan yihiin oo aan la furin, markaa waa inuu furaa oo ka soo saaraa agabka ku jira.
   d. Inuu xisaab ahaan hubiyo natiijooyinka codadka gobolada. Taas oo marka uu ku qanco isugu dubaridayo hab-xisaabeed shaxaysan oo si hufan looga dheehan karo tirsiyada goobaha, wadarta codadka, inta ansaxday, inta xumaatay, qadarka xisbiyadu kala heleen iyo qodarka musharixiinta xisbi kasta gaarkiisa kala heleen oo u kala habaysan heer goobeed, degmo, gobol iyo qaran.
   e. Inuu isku dubarido liiska magacyada murashaxiinta ku guulaystay doorashada Golaha wakiilada ee heer qaran, iyadoo la raacayo habka ku tilmaaman qodobka 12(2/3) ee Xeerkan . Sidoo kale wuxuu soo saarayaa liiska magacyada musharaxiinta doorashada waaya ee noqonaya kaydka ee xisbiyadu u soo gudbiyeen.
   f. Inuu go' aan ka gaadho cabashooyinka ama/iyo dacwadaha (haddii ay Jiraan) ka soo gudba xafiisyada doorashooyinka ee gobolada iyo dacwadaha iyo cabashooyinka ka yimaada xarumaha axsaabta, iyadoo go'aanadaas la diiwaangelinayo.
   g. Inuu hawsha ku dhamaystiro muddo 10 maalmood gudahood ah laga soo bilaabo maalinta codbixinta la qabtay.

**Qodobka 58aad**

**Ku dhawaaqidda & Gudbinta natiiiada hordhaca ah**

1. Komishanku markuu dhamaystiro hawshiisa qodobka 57aad ku sheegan, ee uu ku qanco in doorashadu si habsami ah u dhacday, wuxuu si hordhac ah ugu dhawaaqayaa natiijada doorashada Golaha Wakiilada.

2. Komishanku maalinta uu ku dhawaaqo natiijada hordhaca ah, wuxuu si rasmi ah Maxkamadda Sare ee qaranka u gudbinayaa natiijada doorashada oo dhamaystiran oo ay ku lifaaqan yihiin Liiska magacyada musharaxiinta guulaystay iyo dhokomentiyada kala duwan ee taageeraya natiijada

19.

## Qaybta VI
## SHARCIY A YNTA NA TIIJADA DOORASHADA

### Qodobka 59aad
### Ansixinta Natiijada

1. Gudoomiyaha & Garsoorayaasha Maxkamadda Sare ee Dastuuriga ah ayaa fadhi buuxa ku go' aaminaya ansixinta natiijada doorashada Golaha wakiilada markay:
    a. darsaan qoraalada natiijada doorashada ee Komishanku u soo gudbiyay.
    b. Hubiyaan in xisaab ahaan iyo sharci ahaanba toosan tahay.
    c. Xaqiijiyaan inaan dacwad ka dhan ah go'aanka kumishinka laga furan maxkamadda mudada xeerku cayimay, haddii ay jirtona go,aan ka gaadhaan.

2. Maxkamaddu Sare waxay go'aankeeda ay ku ansixisay natiijada doorashada iyo Liiska Magacyada musharixiinta ku guulaystay kaga dhawaaqaysaa fadhi maxkamadeed oo ay goob joog yihiin madaxda axsaabta, Xukuumadda iyo saxaafaddu

### Qodobka 60aad
### Dhaarinta Mudanayaasha

Maxkamadda Sare marka ay ku dhawaaqdo go'aanka ansixinta natiijada doorashada waxay muddo aan todobaad ka badnayn u cayimaysaa fadhiga dhaarinta Mudanayaasha la doortay ee Golaha Wakiilada. Fadhigaas oo uu gudoominayo Gudoomiyaha Maxkamadda Sare sida ku tilmaaman Dastuurka qodobka 44(3)aad.

### Qodobka 61aad
### Dacwadaha Doorashada

1. Maxkamadda Sare ee Dastuuriga ah, ayaa leh awooda ka garnaqista dacwadaha la xidhiidha doorashada Golaha Wakiilada marka ay ku qanacdo arjiga dacwoodaha.
2. Dacwadaasi waa inay ku soo gaadho kaalinta Maxkamadda Sare 20 maalmood gudahood oo ka bilaabmaya marka lagu dhawaaqo natiijada hordhaca ah ee doorashada. Haddii ay wakhtigaa dhaafto dacwadaasi wax tixgelin ah ma yeelanayso.

## Qaybta VII
## KU XADGUDUBKA XEERKA
## IYO NIDAAMKA DOORASHADA

### Qodobka 62aad
### Dhawridda Xeerka iyo Nidaamka Doorashada.

Dhawridda nabadgelyada guud iyo u hogaansamidda Xeerka iyo nidaamka doorashada waa waajib saaran muwaadin kasta oo u dhashay dalka JSL. Taas awgeed, ku xad-gudubka nidaamka iyo sharciga waxa lagu mutaysanayaa ciqaab.

### Qodobka 63aad
### Eedaynta Komishanka Doorashada

Haddii Xubin ama Xubnaha Komishanka Doorashooyinku ku talaabsadaan fal ay ka dhalan karto dambiyo culus ama khalkhal galin kara nidaamka iyo habsami u socodka doorashada ama xasiloonida guud ee dalka, waxa eedayntooda, maamuus ka xayuubintooda iyo dacwad ku qqadistooda loo cuskanayaa sifaha uu tilmaamayo Dastuurka qodobkiisa 96(1/4/5)aad.

20

## Qodobka 64aad

### Anshax Marinta Ku Xad-Gudubka Xeerka iyo Nidaamka Doorashada

1. Maadaama Komishanku leeyahay masuuliyadda koowaad ee taabagalinta habsami u socodka doorashada, wuxuu awood u leeyahay inuu anshax-mariyo cid kasta oo ku kacda gef idaari ah ama ku xad-gudubta nidaamka iyo xeerka doorashada. Sidaa darted, Komishanku, iyagoo ku go'aan qaadanaya miisaanka iyo saamaynta hadba xad-gudubkaasi leeyahay, waxay anshax marintu noqon kartaa siyaabahan:

   1. Canaan iyo canbaarayn, ama/iyo
   2. Digniin culus oo loo diiwaangelinayo, ama/iyo
   3. Ganaax lacageed

      a) haddii gefka ama xad-gudubka uu gaysto masuul xisbi ama musharax waxa xisbigiisa lagu anshax marinayaa ganaax lacageed oo dhan Sl.Sh. 5,000,000 – 10,000,000

      b) haddii gefka ama xad-gudubka uu gaysto hawlwadeenada doorashada waxa lagu anshax-marinayaa ganaax lacageed oo dhan Sl.Sh. 200,000 – 400,000.

      c) Haddii gefka ama xad-gudubka uu gaysto muwaadin caadi ah waxa lagu anshax-marinayaa ganaax lacageed oo dhan Sl.Sh. 300,000 – 500,000.

3. Haddii xad-gudubkaasi yahay mid culus oo ciqaab lagu mutaysan karo ama khalkhal galinaya nidaamka doorashada ama xasiloonidda guud ama wax u dhimaya nidaamka iyo kala dambaynta, waxa komishànka ama masuuliinta xafiisyada doorashadu amrayaan in la qabto cidda xad-gudubka samaysay, si loo horgeeyo maxkamadda awooda u leh.

## Qodobka 65aad

### Dhaqangaika & Faafinta Xeerka.

Xeerkani waxa uu dhaqangalayaa marka Baarlamanku ansixiyo ee uu saxeexo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda JSL.

*ALLAA MAHAD LEH*

| | |
|---|---|
| (Axmed Maxamed Adan) | (Maxamed Xuseen Cismaan) |
| -Guddoomiyaha G/ Wakiilada Jsl- | -Xoghayaha Guud ee G/ Wakiilada |

21